

# WADIIQAD DOORASHO WADA-GUULEYSI AH



DECEMBER 18


**Somali Peninsula Research Center**

Laxfiskvägen 30,
43338, Partille, Sweden
info@sprcenter.org
www.sprcenter.org

# Horudhac

Soomaaliya waa dal ka soo kabanayo burbur kuna jira hannaan dib u dhis dowladnimo. Dadaallada nabbaddeynta iyo dowlad dhiskeedana ay gacan weyn ka geysaneyso bulshada caalamku.
Ma jirin dowlad ka dhalatay geeddi socodka nabaddeynta iyo dowlad dhisidda Soomaaliya oo ku guuleysata in ay aqoonsi buuxa ka hesho Soomaalida dhexdeeda. Mar waliba waxaa taagnaa ismariwaa iyo muran in laga gaaro heshiis bulsho ku saleysan awood qeybsiga iyo nidaamka siyaasadda.

Si kasta oo ay ahaataba, tan iyo markii lagu aassaasay Carta dowladdii TNG sannadi 2000 iyo maanta, waxa kaliya ay Soomaalidu ku guuleysatay waxay aheyd in awoodda la iskugu wareejiyo si nabbad ah. Waana sunno wanaagsan oo mudan in la dhowro, horayna loo sii qaado.
Dowladdihii is xigxigay waxa ay dalka ka sameeyeen xoogaa horumar ah balse midna kuma guuleysan dhismaha tiirrarka halbowlaha u ah haykalka dowladnimo, haddii ay ahaan laheyd; dhameystirka dastuurka, dhisidda maxkamad dastuuri ah, xasilinta dalka, meel marinta maqaamka caasimadda iyo hirgalinta doorasho qof iyo cod.

Sidaa awgeed, marka la eego is jiidjiidka la xiriira doorashada iyo is afgaran-waaga Dowladda Dhexe, Dowlad Goballeedyada iyo Xisbiyadda Siyaasadda. Waxaa jira dhowr arrimood oo keeni kara rabshado la xiriira doorashooyinka, kuwaa oo dhici karo marxaladdo kala duwan; dalkana galin kara xasillooni darro weyn iyo firaaq dastuuri ah. Wax ka qabashada arrimahani waxa ay ku xiran yihiin qaadashada tallaabooyin ku haboon, si loo maareeyo geeddi socodka doorashada dalka, loogana baaqsado fowdo.

Haddaba, waxaa laga maarmaan ah in qeybaha kala duwan ee hoggaamiyaasha siyaasadda ay gartaan nugulnaanta nabadda iyo hey’addaha dowladda, casharna laga qaato rabshadaha iyo kala qeybsanaanta ka dhasha doorashooyinka dallalka ay khilaafaadka siyaasadda iyo dagaallada ahliga ahi saameeyen. Waqti xaadirkanna dalka iyo dadka la galin khilaaf iyo hardan siyaasadeed dib u dhac u horseedi kara dalka. Waayo, dib u dhac ku yimaada doorashada iyo in ay dhacdo muddo kororsi aan is-afgarad siyaasaddeed laga gaarin, waxa ay abuuri kartaa qalalaase siyaasaddeed oo hor leh, dib u dhac weyna u keeni kara horumarka kooban ee la gaaray tobanki sanno ee ugu dambeysay.

SPR CENTER, iyada oo ka ambaqaadeysa khilaafaadyada iyo degganaan la'aanta ka aloosan Gobalka Geeska Afrika iyo saameynta ay awooddaha dibaddu ku leeyihiin siyaasadda iyo xasilloonida Soomaaliya. Taa oo ay sii dheertahay sare u kaca dhaqdhaqaaqa ciidan, fakar iyo dhaqaale ee ururrada argagixisada; si aad ahna shaki looga qabo in saameyn ku yeeshaan doorashada iyo nidaamka dowliga

ah ee dalka.Si lamidda, waxaa jira welwel iyo tuhun laga qabo xukun maroorsi, ku takrifal awooddeed iyo isbarbaryaac ka dhasha doorashooyin la isku dhinac qabto.

SPR CENTER, Waxaa ay soo bandhigeysaa tallooyin wax ku ool ah oo ay saamileyda iyo bulshada caalamka ah ee daneeya siyaasadda Soomaaliya u adeegsan karaan maareynta caqabaddaha ku gadaaman doorashada, lagana hortago qalalaase siyaasaddeed iyo dib u dhac ku yimaada geeddi socodka dowlad dhiska iyo dimoqraadiyeenta Soomaaliya. Si lamidda, waxaa jira welwel laga qabo xukun maroorsi, ku takrifal awooddeed iyo isbarbaryaac ka dhasha doorashooyin la isku dhinac qabto.

Warbixinta ayaa soo bandhigeysaa wadiiqad maangal ay (Reasonable Roadmap) oo looga gudbi karo ismariwaaga taagan, islamarkaana lagu looga hortagi karo in dalku galo firaag dastuuriya iyo xaalad degganaasho la'aan ah. Mar haddii ay jirin rabitaan ah in dhinacyada isku hayo siyaasadda ka gaaraan hanaanka doorashada isfahan wadar-ogol ah.

## Sharaxaad Kooban Halka U Marayo Hannaanka Doorashada

Sida la wada ogsoon yahay, waxaa muddo dheer ka taagnaa muran qabashada doorashada ka hor heshiiskii 17 September ku gareen madaxweynaha DFS iyo Dowlad Goballeedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka. Haddana, waxaa wali taagan ismariwaa,haddii ay ahaan laheyd muranka laxariira maamulka iyo gacan ku heynta gobalka Gedo oo magaalo madaxdiisu ay tahay goob kamid ah labbada gobbood ee loo asteeyay in dowlad goballeedka  Jubbaland ku qabto doorashada. Sidoonkale Waxaa taagan muran u dhaxeeyo madaxtooyada Soomaaliya iyo Guddoomiyaha aqalka sare oo ku saleysan cidda soo magacaabeysa xubnaha uga mid noqonayo guddiga doorashada Goballadda Waqooyi

Dhanka kale, waxaa muran ka dhashay xubnaha Dowladda Federaalka iyo Dowladdaha Xubnaha ka ah u soo magacaabeen Guddiga Doorashooyinka dadban ee heer qaran. Waxaa cabasho toos ah iyo mid gaar ahba loo gudbiyay Dowladda Federaalka iyo Dowlad Gobolleedyada in ay ka saaraan xubnahaas. Hase yeesha cabashadii ka timid qaar ka mid ah musharixiinta iyo madaxda xisbiyada qaarkooda lama tixgelin oo waxaa lagu adkeystay in aanan waxba laga beddellin; sida ku muuqato doorasho ay qabsadeen Guddiga eedda loo jeediyay iyo Guddiga Xalinta Khilaafaadku.

Waxaa intaa dheer in Musharixiinta qaarkood ee Xamar ku shirayay dhawaanahan ay iyaguna magacaabeen Guddi u gaar ah oo ay u bixiyeen Guddiga Badbaadada Doorashada, taa oo micnaheedu yahay hannaan barbar socda habka Doorashada Soomaaliya (Parellel Process) taa oo halisteeda leh.

## Wadiiqadda

Kadib daraasad iyo falanqeyn kooban ay SPR CENTER ku sameysya halka u marayo hanaanka doorashada Soomaaliya, iyo welwelka shacabka, indheergaradka, siyaasiyiinta iyo bulshada caalamka ee daneysa arrimaha Soomaaliya ka qabaan in ismariwaaga doorashadu uu dalka u hoorseedo xasilooni darro. SPR CENTER, waxaa ay shacabka Soomaaliyeed iyo jilayaasha siyaasadda iyo kuwa caalamiga ee daneeya Soomaaliya u soo bandhigeysa Wadiiqadda Doorasho Wada-guuleysiga (Win win Election Roadmap). Taa oo xal u noqon karta isafgarad la'aanta ka taagan hannaanka doorashada Soomaaliya.

Sida ku cad Qodobka 60aad ee Dastuurka ku meelgaarka ee Dowladda Federalka ah ee Soomaaliya;

> " Muddada Xil-haynta Baarlamaanka Federaalku waa (4) sanno oo ka bilaabata maalinta natiijada doorashada lagu dhawaaqo. Baarlamaanka 10aad waxaa badalaya Baarlamaan la soo doortay."

Waxaa iyana xusin mudan, hadal jeedintii Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Mursal Sheikh Cabdiraxman taariikhda marka ay aheyd 12/12/2020 ee uu ku celiyay in Parlamaanka 10aad sii joogaya ilaa laga soo doorto Parlamaanka 11aad. Sidaa daraadeed, iyada oo laga ambaqaadayo qodobka 60aad farqadiisa 1aad, waxaa lama huraan loo arki karaa in muddo kordhin loo sameeyo Baarlamaanka 2 Aqal ee Dowladda Federaalka Soomaaliya si xal loogu helo ismariwaaga siyaasadeed, loogana baaqsado in marnaan awood iyo mid dastuuri ah dalka ka dhacdo.

Warbixintu waxaa ay soo jeedineysa in muddo kordhin 2 sanno ah oo loo sameeyo 2 Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si loo aado doorasho Madaxweyne iyada oo Baarlamaanka waqti kordhinta helay ay soo dooraanayaan Guddoonka 2 Aqal ee Barlamaanka, dabeedna Parlamanku qabto doorasho madaxweyne . Tani waxay xal u noqoneysaa guddiyada la isku heysto in meesha ka baxaan oo Baarlamaanka 2da Aqal maamullaan doorashada Guddoonka iyo midda Madaxweynaha JFS iyo in laga hor tago in kooxaha xajirka ah iyo ururrada argagixisadu saameyn ku yeeshaan soo xulista xildhibaanada iyo guud ahaan doorashada heer qaran.

Madaxweynaha la doorto waxuu mandate kiisu noqonayaa in uu dhameystiro howlaha dhameystirka u baahan, sida; Dhameystirka Dastuurka, Dhisidda Maxkamadda Dastuurka, Maqaamka Caasimadda, La dagaalanka Argagixisada iyo qabashada doorasho qof iyo cod ah.

SOMALI PENINSULA RESEARCH CENTER
SPR CENTER